

# Ismaamulka San Diego Barnaamijka Difaaca Sharciga Muhaajiriinta (ILDP)

## KU SAABSAN ILDP

Barnaamijka Difaaca Sharciga Muhaajiriinta ee Ismaamulka San Diego waxa soo jeediyey 2021 Kormeere Terra Lawson-Remer waxaana asaasay Guddiga Kormeerayaasha Ismaamulka San Diego. Barnaamijku wuxuu hubinayaa cadaallad iyo sinaan lagu fuliyo dacwadaha muhaajirnimo iyadoo la siinayo dadka dacwadaha masaafurinta kujira matalaad sharci. Barnaamijka waxa rasmiyan laga daahfuray Abril 2022 Xafiiska Difaaca Dadweynaha oo Ogos 2025 waa la balaadhiyey si uu u siiyo adeegyo dadka aan qaangaadhin ee aan cid la socon.

## SHAHAADOOYINKA

Barnaamijka wuxuu siinayaa matalaad sharci oo bilaash ah shakhsiyaadka la leh xidhiidh Ismaamulka San Diego ee hadda ku xidhan xarun xabsi muhaajir, dadka aan qaangaadhin ee aan lala socon, ama kuwa imika kujira xaalad Xabsi oo Kale Ismaamulka San Diego.

## SIDA LOOLA XIDHIIDHO ILDP SI LOO HELO MATALAAD SHARCI

Haddii adiga ama qof aad jeceshahay raadinayo qareen muhaajirnimo si aad ugu heshaan matalaad sharci kiiskaaga muhaajirnimo, waxaad wici kartaa khadka ILDP **(619) 446-2883** si aad ula xidhiidhid.

Markaad wacaysid, u diyaarsanow inaad ka siisid macluumaad shakhsiga aad dartii usoo wacaysid, oo ay ku jiraan magaciisa, taariikhda dhalasho, A# xabsi, arrinta difaaca sharci ee muhaajirnimo ee la filayo (macnaha magangalyo, kasaarida danbi, hakinta masaafuris, iwm), iyo macluumaadka kale ee khuseeya kiiska.

### Qaababka loola xidhiidhayo:

- Khadka ILDP: **(619) 446-2883**
- Kuwa hadda ku xidhan gudaha Xarunta Xabsiga Otay Mesa: Wac khad bilaash adoo garaacaya 1157#
- Iimaylka:  
[oac.immigration@sdcounty.ca.gov](mailto:oac.immigration@sdcounty.ca.gov)

### Saacadaha Shaqada ee Khadka:

- Isniin ilaa Jimce 8:00am-5:00pm.
- Haddii aad wacdid wakhti kabaxsan saacadahan, reeb farriin kadibna wicitaankaaga waxa looga soo jawaabi doonaa sida ugu dhakhsaha badan inta lagu jiro saacadaha maalmaha shaqada.

Wixii su'aalo ee ku saabsan ILDP, fadlan kala xidhiidh Xafiiska Golaha Loo Xilsaaray (OAC) halkan [oac@sdcounty.ca.gov](mailto:oac@sdcounty.ca.gov).

## SAAMYNTA BARNAAMIJKA



**3,000** qof ayaa la matalay ilaa 2022



**12,500** wicitaanada laga helay shakhsiyaadka raadinaya matalaad, celcelis ahaan

**35** wicitaan maalintiiba



Heerarka matalaada ee shakhsiyaadka lagu xidhay Otay Mesa ayaa saddex laabmay, laga bilaabo **10%** ilaa **41%**



**40%** kiisaska leh natiijooyin waaweyn oo ay ka dhasheen guul ama joogitaan dalka ah. (2002-2025)

## FARRIINTA KORMEERE TERRA LAWSON-REMER

Afar sano kahor, waxaanu bilownay Barnaamijka Difaaca Sharci ee Muhaajirka ee Ismaamulka San Diego annagoo leh karti geesinimo leh: In la hubiyo in aan qof katirsan bulshadeenu waajahin khatar masaafuris khalqadan kaligii iyadoo sababtu tahay kaliya in aanu awoodi karin qareen.

Maanta, waxaanu ku faanayaa inaan idinla wadaago in barnaamijkani siiyey matalaad sharci oo muhiima inkabadan 3,000 oo qof, isagoo u taagan cadaallad, nidaam fiican, iyo sharafta binaadamka. Way ku mahadsan yihiin shuraakadeena sharci ee dadaalaysa iyo caawimada bulshadeenu, waxaanu sameynaynaa isbaddel dhaba annagoo isku haynayna qoysaska oo hubinayna in muhaajiriinta xaafadeheenu helaan fursad dagaal ay ku joogaan goobta ay ugu yeedhaan guri.

Barnaamijkani wuxuu kabadan yahay kaliya matalaad sharci-waa cadaallad, sinaan, iyo nidaam saxa. Annagoo ka turjumayna saameynta barnaamijkani, waxaan aad ugu faraxsanahay waxa aynu gaadhay iyo xataa siday innooga go'an tahay inaan dhisno shaqadan muhiimka ah sannadada soo socda.

Ismaamulka San Diego wuxuu xoogan yahay markan aan xajisano qiyamkeena ku xusan Dastuurka Mareykanka, waxaan ku faraxsanahay qofkasta oo ka shaqeeyey in barnaamijkani guulaysto. Wadajir, waxaynu dhisaynaa bulsho qofkastaa haysto fursad uu ku kobco.

### - Kormeere Terra Lawson-Remer

Guddiga Kormeerayaasha Ismaamulka San Diego